

**KU: MAXKAMADA RACFAANKA GOBOLKA BANAADIR.**

**UJEEDDO: HESHIIS LABO DHINAC IYO KA NOQOSHO DACWO.**

**Maanta** oo ay taariikhdu tahay **18/05/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

**DARAFKA 1'AAD:- MOHAMMED HUSSEIN DIRSCHE AHMED.**

**DARAFKA 2'AAD:- ABEY MOHAMED DAHIR** oo uu Wakiil ka yahay Abdihafid Hassan Aden

**B-** Aniga oo ah **MOHAMMED HUSSEIN DIRSCHE AHMED**, Somali ah, Hooyo: Fadumo Hashi Balle, Ku Dhashay: Somalia, Sanadkii: 1961, Degan Denmark Hadana Ku Sugaan Muqdisho, Sita: Denmark Passport, Lr. 212624827, Waxaan Qoraalkaan Ku Cadeynayaa aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba Ka Fayow Cid I qasabtayna aysan jirin in aan Ka Noqday Dacwadii igala Dhaxeysay Abey Mohamed Dahir oo uu Wakiil ka yahay Abdihafid Hassan Aden Dacwadaas oo Ku Saabsaneed **1-** Dhul Banaan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(Hodan)**, Cabirka: **(20X15)-M**, Looto No: **35-F**, W.M.L: **(B177/92074/2020)**, Tr. 11/07/2020, Kana Soo Baxay Nootaayo Banaadir, Uuna Saxiixay Dr. C/raxmaan Maxamuud Cali (Timacadde) **2-** Guri Dhisn oo Jiingad ah oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(Hodan)**, Cabirka: **(20X15)-M**, Looto No: **78-F**, W.M.L: **(541037/2016)**, Tr. 12/01/2016, Kana Soo Baxay Nootaayo Xamar, Uuna Saxiixay Dr. Maxamuud Xuseen Diirshe.

Waxaan ugu Danbeyntii Cadeynayaa in aan Ka laabtay Dacwadaas isla Markaana aan Heshiinay Labadeena Daraf Si Sulux ah, Waana Ku Qanacsanahay, Waxaana Maxkamadda Sharafta Leh Ka Codsanayaa in ay noo sameeyaan Gal Xiris Maadaama aan Heshiinay.

**T-** Aniga oo ah Abdihafid Hassan Aden Wakiilna ka ah Abey Mohamed Dahir Sida Ku Cad Wakaalada Ku Lifaagan Dukumintigaan Waxaan Cadeynayaa in aan Ku Qancay Caddeynta Sare Ku Xusan Isla Markaana aan Raali ka ahay.

**SAXIIXA DARAFKA 1'AAD**

MOHAMMED HUSSEIN DIRSCHE AHMED



**=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=**

1-MAXAMED CABDI CALI



**=SAXIIXA DARAFKA 2'AAD=**

ABDIHAFID HASSAN ADEN



2- C/RAXMAAN C/LLAHI KULAN




**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

**REP. 1587/T.P.N/25, Tr. 18/05/2025**, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- Mohammed Hussein Dirsche Ahmed Ahna** (Darafka 1'aad), **2- C/xafiid Xasan Aadan Ahna** Darafka 2'aad) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Cadeyntaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





MOHAMMED HUSSEIN DIRSCHE AHMED

ABDIHAFID HASSAN ADEN



MASAWIRADA MARKHAATIYAASHA

1-MAXAMED CABDI CALI

2-C/RAXMAAN C/LLAHI KULAN







FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA  
BENADIR TIMA ADDE PUBLIC NOTARY OFFICE

Ujeedo : Hibo dhul banaan oo (munajibaale ah)

Date: 11-07-2020

Muqdisho maanta oo ay taariikhdu tahay 11/07/2020, Anigoo ah **Xasan Maxamuud Nuur Seed** Soomaali ah, ina **Faraxad Cali Madaxey**, kuna dhashay **Gaalkacyo**, sannadkii 1954-dii, daggan **Muqdisho**, lehna (sawirka warqadaan ku dhagan) tell.0613500414, damiin xaga aqoonsi ahna uu iga yahay **Abdi Gaaiye Farah** lehna ID-passport-ka No: **25601013763542** ee warqadda ku dhagan), isla markaasna ka caafimaad qaba wax allaale iyo wixii wax uu dhimi kara maskaxda iyo jirka bini'aadamka cid i qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxaan si buuxda u cadeynayaa in aan iska hibeeyay dhul **hal-boos** banaan oo aan ku leeyahay degmada **Hodon** kana kooban cabir dhan **20X15/M lotto No: 35-F** lehna **WML:- Bollettario No: 8 Bolletta No: 12 sanadka 1987** ee Tr. **26/01/1987** kana soo baxay Dawladda hoose ee Muqdisho, iyadoo uu iga lumay warqadda lacag qabashada ee No: **347688** ee tr. **10/01/87** isla markaasna aan damiinu-maal ka ahay wixii ka yimaada, Jihooyinkiisuna kala yihiin:- **Galbeed jid, Waqooyi jid**, inta kale dhul dad, waxaan dhulkaan u hibeeyay kuna wareejiyay **Mohammed Hussein Dirsche Ahmed** Soomaali ah, ina **Fadumo Hashi Balle**, kuna dhashay **Duusamareeb**, sannadkii 1961-dii, daggan **Muqdisho** tell: **0617334464**, dhulkaani wuxuu ka madax banaan yahay deyn, rahan iyo sheegasho cid kale, wixii mulkiyadiisa ku yimaado oo duritaan sharci ah ama sheegasho cid kale ah aniga oo ah iska hibeeye **Xasan Maxamuud Nuur Seed**, ayaa damaanad qaadaya magdhawgiisa, sidaa darteed waxaan mulkiyadda dhulkaani dheeftiisa deegaan, iyo wixii canshuur dowlo ah ku wareegtay **Mohammed Hussein Dirsche Ahmed**.

Anigoo ah **Mohammed Hussein Dirsche Ahmed**, waxaan cadeynayaa in aan raali ka ahay hibada dhulkaan lana wareegay dhulkaan iyado aan ku ogahay in uu ka lumay warqadda lacag qabashada ee No: **347688** ee tr. **10/01/87** isla markaasna aan ku qancay, waxaana markhaatiyaal ka ahaa hibada Dhulkaan ragga hoos ku qoran:

**Saxiixa iska hibeeyaha**

Xasan Maxamuud Nuur Seed

**Saxiixa loo hibeeyaha**

Mohammed Hussein Dirsche Ahmed

**Saxiixa Marqaatiyaasha**

1. Maxamed Cabdullaahi Cali

2. Maxamed Cabdi Axmed

3.damiin: Abdi Gaaiye Farah

**Xafiiska Nootaayo Banaadir Timocadde**



**Saxiixa la Sugay**

REF: **B177/92074/020**

Anigoo ah Xafiiska Nootaayo Banaadir Timocadde Dr. C/raxmaan Max'uud Cali (Timocade) oo ku yaala degmada wadajir Agagaarka KM4 waxaan halkaan ku sugayaa in Saxiixa sare ku qoran uu yahay kii dhabta ahaa ee iska hibeeye **Xasan Maxamuud Nuur Seed** iyo Markhaatiyaasha **Maxamed Cabdullaahi Cali** tell.0615700121 iyo **Maxamed Cabdi Axmed** tell.0615717217, waxayna ku saxiixeen xafiiska dhexdiisa iyadoo aan cidina qasbin, kadib markii ay iska aqriyeen fahmeenna dhammaan qoraalka ku qoran waana ku qanceen sida qoraalkaan u qoran yahay, waxaan ku qoray oo ka saxiixay diiwaana guud ee nootaayada


Xafiiska Nootaayo Banaadir Timo Cadde  
Dr. C/raxmaan Maxamuud Cali (Timo Cadde)

*Waa la dhawaaqay  
Zabi Dheer  
Leo Magac War*




14/7/2020

Xasan Maxamed Nuur Seed




Maxamed Xuseen Dirsche




Bee  
R. 1580/T.P.N/25  
T. 17/05/25  
10X15.M  
L. 35-F  
NUSKA HAL JIDIAOH

Maxamed Cabdullahi Cali



Maxamed Cabdi Axmed



Abdi Gaaiye Farah





XAFIISKA NOTAAYAHA XAMAR  
PUBLIC NOTARY OFFICE

12/01/2016

ORIGINAL

MOGADISHU-SOMALIA

JAMHUURIYADDA F.SOOMAALIYA

Dr. Mohamud Hussein Diirshe

Public Notary Office Mogadishu-Somalia

XAFIISKA NOTAAYAHA XAMAR  
PUBLIC NOTARY OFFICE

12/01/2016

ORIGINAL

MOGADISHU-SOMALIA

**Ujeedo:- HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANAAN OO MUNICIPALAH.**

Muqdisho maanta oo ay taariikhdu tahay 12/01/2016, anigoo ah Dr' Maxamuud Xuseen Diirshe, oo xafiis nootaayo ku leh suuqa bakaaraha, degmada H/wadaag, waxaa xafiiskeyga iigu yimid iyadoo soo heshiyey mudanayaasha magacyadoodu hoos ku qoran yahiiin, iyadoo iga codsaday in aan u kala qoro heshiiska ujeedada sare ku qoran, waxayna horteyda ka cadeeyeen sidaan:- anigoo ah Cabdixafiid Xasan Aaden, oo soomaali ah, degan xamar, dhashay sanadkii 1958kii, oo hooyadeey la yiraahdo Xabiiba Kaafi Faarax, sita ID. No. 25805156665168-Soomaaliya, oo wakiil ka ah Cabdulqaadir Axmed Ibraahim, sida ku cad warqadda wakaaladda ah ee lam. yahay 539093/2015 ee tr. tahay 02/11/2015, uuna qoray Nootaayo xamar, kuna saxiixan yahay Dr' Maxamuud Xuseen Diirshe, waxaan qoraalkaan ku caddeynayaa, iyadoo uu xiskeygu taam yahay, in aan ka iibiyey, oo aan ku wareejiyey si rasmi ah {**Abey Mohamed Dahir, oo soomaali ah, 27jir ah, oo hooyadiis la yiraahdo Dahabo Shaalle Cumar, degan Xamar**}, Dhulka Banaan oo Municipalaha ah, kuna yaala Magaalada Muqdisho, Degmada Hodan, Cabirkiisuna dhan yahay **{20x30}**-mitir, Lotto No. **78-80-F**, oo soohdimihiisu kala yihiin **Bari** waxaa ka xiga dhul dad, **Galbeed** Waxaa ka xiga Jid, **Koofur** waxaa ka xiga Jid, **Waqooyi** waxaa ka xiga dhul dad, sida ku cad W.M.L. yahay B/B/52/45/2015 ee tr. tahay 14/10/2015, kana soo baxay Dawladda Hoose ee Muqdisho, Hadaba iyadoo hadalka lasoo qoray I yo kan soo socdaba ay wada xiriiraan, ayaa misna anigoo ah Cabdixafiid Xasan Aaden, waxaan marlabaad caddeynayaa, in dhulkaan aan iibiyey, uu ka madax-banaan yahay rahan iyo sheegasho Dad kale, islamarkaana ay milkiyaddii Dhulkaani u wareegtay Abey Mohamed Dahir, Waxaanu ku kala gadanay qiimo dhan **\$22,000.00 (Labaatan iyo Laba Kun oo Doollar)**, oo kala bax ah, iyadoo gacanta la iga wada saaray lacagtaas, iyadoon waxba ka maqnayn, anigoo ah Cabdixafiid Xasan Aaden, Sidaas darteed, wixii dhib ah, ama dood ah, ama duris sharci ah, amase sheegasho dad kale ah, ee ka yimaada milkiyadda dhulkaan waxaa damiin iyo masuul buuxa ka ah, anigoo ah Cabdixafiid Xasan Aaden, la wareeguhuna waa uu aqbalay Beecan, waxaana marag ka ah raga hoos ku saxiixan, wada degan xamar.=====

Saxiixa Warejiyaha.

Cabdixafiid Xasan Aaden

Saxiixa La wareegaha.

Abey Mohamed Dahir

Marqaatiyaalka

1. Cali Siyaad Cadow Maadeey

2. Cabdiwali Xuseen Aaden

Rep. No.541037/2016

Muqdisho 12/01/2016.

Saxiixyadda La sugay

Anigoo ah Dr' Maxamuud Xuseen Diirshe, oo Nootaayo Xamar ah, waxaan Caddeynayaa, in saxiixyadda kor ku qorani ay yihiin, kuwii Dhabta ahaa, ee Cabdixafiid Xasan Aaden, oo soomaali ah, degan xamar, {ahna iska iibiye}, iyo La wareegaha Abey Mohamed Dahir, oo soomaali ah, iyo marqaatiyaalka kor ku qoran, oo soomaali wada ah, waxay heshiiskan ku wada saxiixeen horteyda, iyadoo dhamaan xis qaba.

NOOTAAYAHA

Dr' Maxamuud Xuseen Diirshe








**FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA**

**Tr. 18/05/2025**

Aniga oo ah **Maxamed C/llaahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Maxamed Xuseen Diirshe** oo ka Wakiil ah Loo Caddeeye **C/XAFIID** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 1587/T.P.N/25, Tr. 18/05/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>KU :</b>	Maxkamadda Racfaanka Gobolka Banaadir
<b>Taariikhda Caddeynta</b>	18/05/2025

**Wakiilka Loo Caddeeye:** Aniga oo ah **Maxamed Xuseen Diirshe**, Leh Tel No. **0617334464**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **C/XAFIID**.



**SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA**

**Maxamed C/llaahi Maxamed**

**SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA**

**Maxamed Xuseen Diirshe**